



## **Haduu ninku soo galo gurigiisa, ee uu Ilaahay xuso markuu soo galayo ama uu baxayo ama uu cuntadiisa cunaayo, shaydaanka ayaa dhaha: halkan hoy iyo cashaba kuma lihin**

Jaabir Binu Cabdullaahi-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu ka maqlay Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- inuu yiri: " Haduu ninku soo galo gurigiisa, ee uu Ilaahay xuso markuu soo galayo ama uu baxayo ama uu cuntadiisa cunaayo, shaydaanka ayaa dhaha: halkan hoy iyo cashaba kuma lihin, marka uu soo galo ee uu xusi waayo Ilaahay, shaydaankaa ayaa oronaya: hoy iyo casho ayaad soo gaadheen.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu amray in Ilaahay la xuso marka guriga la galayo iyo cuntada ka hor, marka qofku Ilaahay xuso isagoo dhahaya (bismillaah) maarkuu gurigiisa galayo iyo marka cuntadiisa uu bilaabay, shaydaanka ayaa ku dhaha taageerayaal kiisa: hoyaatin iyo casho kuma lihidin gurigaan ninkii iska lahaa idinka magan galay dikriga Ilaahay. Hadiise ninku soo galo gurigiisa oo uusan xusin Ilaahay markuu guriga galayo iyo markuu cuntada cunaayo shaydaanka ayaa u sheegaya taageerayaalkiisa inay guriga ku leeyihiin hoyaatin iyo cashaba.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3037>